

UJEEDDO. CADDEYN LABO DHINAC AH.

Muqdisho maanta oo taariikhdu tahay Labaatanka bisha January ee sanadka Laba kun iyo Labaatanka & Labada (20/01/2022).

DARAFKA 1'AAD Anaga oo Kala ah 1-C/Ilaahi Axmed Idle Somali ah Hooyo Jawaahir Jaamac Xuseen Ku Dhashay Ceeri-Gaabo Sanadkii 1987, Sita W.A.L.1327/Wasaaradda Howlaha Guud 2-C/rashiid Aadan Ducaale Somali ah Hooya Xaawo Axmed Aadan Ku Dhashay Ceeri-gaabo 1974 Sita W.A.L.010475-21337804/Somaliland.

Wakiilna ka ah Barkhad Jibriil Xasan ahna Milkiilaha Kambaniga Barkhad Jibril Hassan Ltd Sida Ku Cad Wakaalada Ku Lifaaqan Dukumintigaan, Wakaaladaas oo Ku Saabsaneyd in aan u Soo iibino Malmal Waxaana Kambaniga Al Cadaala Gum oo Wakiil u yahay Axmed C/raxmaan Cumar uga Soo iibinay 50.000 oo Kiilo oo Malmal ah, Waxaana Ku Heshiinay In Malmalkaas aan Ku Kala iibsano Sidatan:-

No	Nuuca Malmalka	Inta Kiilo	Qiimaha	Total
1-	Xusul	36,000 "Sodon iyo Lix Kun oo kiilo	36,000X \$13.5	US\$.486.000
2-	Sarac	14,000 "Toban iyo Afar Kun oo kiilo	14,000X \$11	US\$.154.000
			TOTAL	= \$.640.000

Waxayna Lacagta Guud ahaan aan Malmalka Ku Soo iibinay ay Noqotay Lacag Dhan US\$.640.000 "Lix Boqol iyo Afartan Kun oo dollar" Waxaan Hormaris ahaan u Bixinay Lacag Dhan US\$.275,000 "Labo Boqol Todobaan iyo Shan Kun oo dollar" Waxaana Haray oo Nalu leeyahay Lacag Dhan US\$.365,000 "Sadax Boqol Lixdan iyo Shan Kun oo dollar" Waxaana Lacagtaas aan Ku Bixin doonaa Mudo 3 Bilood iyo Toban Bari, oo Ka Bilaabaneysa Maanta oo ay Taariikhdu tahay 20-01-2022 Kuna Eg 01-05-2022 insha allah.

2- **DARAFKA 2'AAD** Anigoo ah Axmed C/raxmaan Cumar Wakiilna ka ah Kambaniga Al Cadaala Gum Waxaan Cadeynayaa in Ku Qancay Cadeynta Sare Kuu Xusan. FG.
Cadeyntaan Labada Dhinac ay Ku Heshiiyey Wakiilka Darafka 2'aadna Wuu Kuu Qancay Wakaalada Sare Kuu Xusan iyo Cadeyntaan.

SAXIIXA DARAFKA 1'AAD

C/Ilaahi Axmed Idle

&

C/rashiid Aadan Ducaale

SAXIIXA DARAFKA 2'AAD

Axmed C/raxmaan Cumar

SAXIIXYADDA MARKHAATIYAAL

1-Muuse Maxamed Muuse

2- Yuusuf Saalax Jaamac

Rep. 054/TPN/2022

(CADDEYN TA NOOTAAYAHA)

Tr. 20/01/2022

Anigoo ah Nootaayaha Tayo, **Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1- C/Ilaahi Axmed Idle & C/rashiid Aadan Ducaale (Ahna Darafka 1'aad") 3- Axmed C/raxmaan Cumar (Ahna Darafka 2'aad) iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Cadeyn Labo Dhinac oo ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

NOOTAAYAHA

Dr, Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"



MASAWIRADA DARAFKA 1'AAD

C/Ilaahi Axmed Iidle



C/rashiid Aadan Ducaale



MASAWIRKA DARAFKA 2'AAD

Axmad C/raxmaan Cumar




MARKHAATIYAASHA

Muuse Maxamed Muuse



Yuusuf Saalax Jaamac



Jamhuuriyadda Somaliland

Kaadhka Aqoonsiga Muwaadinka



Republic of Somaliland

National Identity Card

Tirsiga Aqoonsiga / ID Number

010475-21337804

Magaca / Name

CABDIRASHIID

AADAN DUCAALE

Taar. Dhalashada / D.O.B


01-04-1975

Taar. La Bixiyey / Date of Issue

18-04-2015

Jinsiga / Gender

Lab/Male



Haddii aad hesho kaadhkan fadlan keen xafiisyada wasaaradda
arrimaha gudaha ama saldhiga boolis ee kuugu dhow.

If you find this card, please return to the issuing
organisation or to the nearest police station.



SAXEEX

Magaca Name: *C/Calas Ahmed*

T/Dhalashada: *1987-11-01*
Date of birth:

Meesha Dhalashada: *C/Keedo*

Place of birth:

Halka lagu bixiyey: *Hargaysa*

Place of issue:

Taariikhda la bixiyey: *24/06/17*
Date of issue:

Lamb. Diiwaan-gelinta: *1327/017*
Registration No:

Saxeexa Madaxa: *[Signature]*
Signature of Authority




**JAMHUURIYADA SOMALILAND
REPUBLIC OF SOMALILAND**

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD,
GURIYEYNTA IYO GAADIIDKA
MINISTRY OF PUBLIC WORKS,
HOUSING AND TRANSPORT**

**DRIVING LICENCE
LIISANKA WADIDA**

**GOVERNMENTAL VEHICLE
GAADIIDKA DAWLADDA**

1327





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

MINISTRY OF COMMERCE AND INDUSTRY

RUQSADDA GANACSIGA
COMMERCIAL LICENSE
EXPORT

DATE: 11/01/2020

Shatti Lam/license No. 070178

Magaca Shirkadda: Name of the company:	AL CADAALA GUM GENERAL TRADING .CO		
Tariikhda la diiwan galiyey Registration date	07 / 01 / 2018		
Nooca Ganacsiga Type of Business:	DHOOFINTA XABKAHA IYO BEEYADA		
Nooca Shirkadda Company form:	EXPORT		
Cinwaanka Shirkadda Address of the company:	Tell: +252615884449.Email:cabdishire122@gmail.com		
Maamulaha Shirkadda Manager/Director	ALI GAATAXO YUSSUF		
Jinsiyadda: Nationality:	<input checked="" type="checkbox"/> muwaadin Somali citizen	<input type="checkbox"/> ajnebi foreign citizen	<input type="checkbox"/> laba jinsiyadood double citizen
Tariikhda labixiyey Date of issue:	11/01/2020	Business ID NIL	
Tariikhda uu dhacayo Expiry date:	10 / 01 /2021		

Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha waxa ay caddeyneysaa in ganacsigani ku saleysan yahay §qodobka 3aad, Sharci Lam. 8/1964 iyo qodobbada 4,5, iyo 6aad ee sharci lambar 204/1964, ee sharciga ganacsiga dalka

The Ministry of Commerce and Industry has approved the legality of the business in accordance with §article 3, law nr. 8/1964 and article 4,5, and 6 law nr. 204/1964, Somalia commerce law.

FG. Qof kasta oo ka been abnura ruqsaddan ganacsiga waxa uu gelayaa Dambi ciqaab ah sida uu qabo sharcigu § Qodobada 372 iyo 373 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. Midda kale, ruqsadaha ganacsiga waxa ay dhacayaan 12 bilood oo ka bilaabaneysa xiliga ay ruqsaddu soo baxday.

NB. Anyone who falsifies this commercial License should note that he/she commits a punishable crime in accordance with §article 372 and 373 of the Somali Penal Code. On the other hand, please note that all Business Licenses will expire after 12 months from the date of commencement and must be renewed it.

Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha
(The Minister of Commerce and Industry).
Eng. Abdullahi Ali Hassan





RUQSADHA GAARKA AH IYO ADEEGYADA
DIIWAAN GELINTA SHAHAADADA GANACSIGA

EXPORT AND IMPORT PERMIT
BUSINESS LICENSE REGISTRATION

Export and Import LICENSE

Waqtiga la diiwangaliyey/Reg Date: 29/10/2017

Shati No: WGW/070615/LD-18



WAXAY CADDEYN

Magaca Shirkadda:

BARKHAD JIBRIL HASSAN LTD

Shaqada uu qabanayo:

DHOOFINTA XABKAHA (BEERYADA MALKALKA FOXA FALEENKA)

Taariikhda la bixiyay:

29/10/2018

Taariikhda ay dhacayso:

28/10/2019

Wasaaradda Ganacsiga iyo warshadaha ay u diwaangelisay in uu yahay ganacsigaani mid waafaqsan Qodobka 3-aad sharci No 8 soona baxay Oktoobar, 1964 Ganacsiga Dibadda.

Diiwaangelintaan waxaa loo cuskaday Qodobka 1-aad farqadiisa 4-5 iyo 6 ee sharci wasaaradeed No. 204 soona baxay 26 September 1964 ee xeerka Dhaqdhaqaaqa Ganacsiga Dibadda.

THIS IS TO CERTIFY THAT

Company / Name:

BARKHAD JIBRIL HASSAN LTD

License activities:

EXPORT

Issue Date:

29/10/2018

Expiry Date:

28/10/2019

Is registered as foreign trader with the Ministry of commerce and Industry in terms of article 3 of law No: 8 of 29 October 1964 on foreign Economic Transactions.

This registration is subject of the provisions of article No. 1, paragraphs 4-5 and 6 of ministerial decree No.204 of 26 September, 1964 on the regulation of foreign Economic Transactions.

Wasiirudowlaha Wasaaradda ahna k/simaha Wasiirka
Daahir Cabdi Cabdullahi (Dr Go)





RepNo.7581/BRK/2017

Tr.21/12/2019

UJEEDDO: DHISME SHIRKAD LA MAGAC BAXDAY SHIRKADDA:
AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO.

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay 21/12/2019, anigoo ah Nootayaha Dr SACIID CALI MAXAMUUD ahna Nootayaha TAAKULO Muqdisho waxaa Xafiiskeyga oo ku yaala Muqdisho Degmada H/wadaag gaar ahaan wadada 2aad ee suuqa bakaraha sarta STN iigu yimid

1. Ali Gaataxo Yussuf soomaali ah lehna Passport N.P00511029-Som
2. Abdinur Muhyadiin Maxamed soomaali ah lehna Passport N.P00617941-Som
3. Ahmed Abdirahmaan Omar soomaali ah lehna ID No.27810103242213-Som

Mudanayaashaas oo magacyadooda kor ku qoran yihiin oo ka kaaftoomay kaalmo marqaati oon aniga Nootayaha Taakulo ah aqoonsaday ayaa waxuu iga codsadeen in aan is badal ku sameeyo xeer hoosaadka shirkaddahirkadda AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO oo tixraacisu ahaa 2720/BRK/17 Tr.04/01/2018 kana soo baxaday xafiiska Nootayaha Taakulo uuna saxiixay Dr.Saciid Cali Maxamuud waxana u qoran yahay sida soo socoto

Qod:1aad Dhismaha Shirkadda

In ay dhiseen Shirkad la magac AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO oo lagu Aasaasay Moqdisho Somalia, Sanadka 01/01/2010 waxaana aasaasay oo shaqana geliyay Mudanayaashaas aan kor ku soo sheegnay.

21 DEC 2019

DR. SADIID CALI MAXAMUUD
Mogadishu - Somalia

Qod 2aad: Mudada Jiritaanka Shirkadda.

Mudada Shirkaddu ay jireyso waa 50 san oo laga bilaabayo maalinta qoraalkaan la qoro laguna qoro buugga Diiwaangalinta Hayadaha sharciga ah, hase yeeshee mudadaas waa la kordhin karaa waana la baabi' in karaa waa haddii loo baahdo. - - -

Qod. 3aad: Hantida Shirkadda.

Hantida shirkadda Lagu aasaasay waa \$USD 97,100 (Sagaashan iyo todobo kun iyo boqol oo doolar) oo u dhiganta 2,000, share oo Xubnaha Shirkaddu isku darsadeen una kala leeyihiin

Magaca	share	Qiimaha shareka	Isku geenta qiimaha lacagta	100%
Abdinur Muhyadin Mohamed	800	\$ 48.55	\$38,840	40%
Ali Gaataxo Yussuf	640	\$ 48.55	\$31,072	32%
Ahmed Abdiraxmaan Omar	560	\$ 48.55	\$27,188	28%

Qod. 4aad: Diiwaanka Hantida Saamilayda.

1. Waxaa ku cad inta uu uu la egyahay qiimaha saami kasta, inta uu saami leeyahay xubin kasta, Magaciisa/Magaceeda, xadidiga uu dhiibay taariikhda la dhiibay iyo dhamaan war bixinadiisa oo tifatiran waxaana kaydinya Xoghayaha Maamulka Shirkad.
2. Waxaa saxiixayo maamulka shirkada marka la dhameystiro cadaymaha saamiga iyo saamilaha
3. Saamilahah waxaa la siinayaa shahaado cadeyneysa saamigiisa, waxaana saxiixay maamulka shirkada iyo saamilaha.

Qod. 5aad: Luminta Xubinnimada.

- Waa inuu qoraal ku soo codsadaa ka bixidda saamilayda shirkada

- Haddii ay isku raacaan **2/3 xubnaha** aas' aasayaashu wuu ka bixi karaa
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda
- Haddii ay ku cadaato inuu ku takrifalay hantida ama magaca shirkada
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamilayda waa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'iido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka



Qod. 6aad: Gudiga Fulinta

1. Golaha Aas' aasayasha waxay magacabayaan guddi fulineed oo qabta howl maalmeedka shirkadda
2. Gudigu fulinta tiradooda waxa xadidayo golaha aas aas' aasayasha
3. Mudada gudigu shaqeynayo waxaa xadidayo golaha aas aas' aasayasha
4. xubinta gudiga fulint kuma qaamoobayso shaqsi ahaanteed arin ay wakiil uga tahay shirkadda hadii an la cadayn in ay si cad ugu xadgudubtay masuulyadii ay shirkadda ku mataleesay

Qod. 7aad: DOORASHADA GUDOOMIYAHA GUDIGA FULINTA IYO KU XIGEENADIISA

1. Aas' aasayasha ayaa dooranayo gudoomiyaha iyo ku xigeenkisa
2. Gudoomiyaha iyo kuxigeenkiisa waxay xilka haynayaan 2 sano oo la cusboonayn karo
3. hadii xilka gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisu banaanado waxaa loo buuxinayaa hab la mid ah habkii loo doortay
4. hadii gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa mar xilka wada baneeyaan waxaa xoghayaha fulinta ku dhawaqaya fadhi aan caadi ahayn mudo bil gudaheed ah ,xilkoodana isaga sii hayn doona inta shirkka golaha boodku qabsoomayo



Qod 8aad: Ujeedooyinka Shirakadda

Soo dajinta iyo dhoofinta Xabagta

Soo Dejinjta iyo Keenista products tayo sare leh

Soo Dejinjta iyo Keenista dawada tayo leh, cosmetics iyo food products

keenista cabitaaano tayo wanagsan leh

Keenista caano la soo tijaabiyay tayadooda

Alaabta cosmataciska nuucyadooda kala duwan

Ugu adeegidda macaamiisheed si heer sare ah oo daboolaysa baahiyahooda

Dhiira gelin iyo soo dhaweeyn sare u sameyen macaamiisheed gudaha iyo

dibada dawada tayo leh, cosmetics iyo food products

Hormarinta Iyo tayenta dawada tayo leh, cosmetics iyo food products ee soomalia

U fududeynta macamiishada howlaha shirkadda AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO

Qod: 9 aad Saldhigga Shirkadda

Saldhigga Shirkaddu waa Mogadishu caasimada dalka Somalia, waxayna xarumo ka furan kartaa dhammaan Gobolada dalka Somalia oo idil iyo Dalka dibadiisa

Qod. 10 aad: Guddoonka Shirkadda.

1. Maamulaha Idman ee shirkadda ee ugu horreeya waa **Ali Gaataxo Yussuf** oo jagadaas heynaya, wuxuuna awood buuxda u leeyahay Maamulka Guud ee Shirkadda, sida in uu lacag ku shubi karo kana saari karo Bankiyada dalka & Dibadaba, saxiixo jeegaga & seenyooyinka, rahan geliyo hantida shirkada kana saari karo, u soo gadi karo, una sii iibin karo shirkada hantida Maguurtada iyo Guurtada sida, dhulalka, guryaha, Baabuurta, agabyada iwm, lana gelo heshiisyo & macamiil shirkado kale & Hayadaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheynba oo ay dani ugu jirto shirkadda.

Qod: 11 aad Xisaabta Socota e Shirkadda

Xisaabta socota ee Shirkada waxaa la xirayaa sanadkiiba hal mar ayadoo hadba la eegayo baahida jirta oo lana tix galinaayo hadba wixii mudnaanta leh.

Qod: 12 aad Fadhiga Shirkadda

Fadhiga Caadiga ah iyo kan aan caadiga ahayn ee Shirkadda waxaa isugu yeeri kara Guddoomiyaha Shirkadda, ama ku simaha, waana in lagu war galiyaa xubnaha Shirkadda 7 cisho ka hor meesha shirku ka dhacayo, loona sii cayimo oo loo sii sheego.

Qodobka 13 aad:

Hawl-wadeenadda Shirkadda (Board of Directers)

Ali Gaataxo Yussuf

Abdinuur Muhyiin Mohamed

Ahmed Abdiraxmaan Omar



Qodobka 14 aad

Wixii aan qoraalkaan ku caddeyn waxaa loo raacayaa sida uu sharcigu qabo ee u dhigan Shirkadaha noocaan oo kale ah iyo qawaaniinta dalka.

Qodobka 15 aad

Qoralkaan oo ku qoran shan bog oo buuxda waxaan u aqriyey dhammaan dadka loo qoray waxayna ii sheegeen inuu ugu qoran yahay sidii ay rabeen wayna wada saxiixeen dhammaantood.

Ali Gaataxo Yussuf Gudoomiyaha Shirkadda _____

Abdinuur Muhyiin Mohamed Gudoomiya ku xigen _____

Ahmed Abdiraxmaan Omar Xubin _____

NOOTAYHA TAAKULO
DR: SACIID CALI MAXAMUUD



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC




L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
27810103242213

WARAQADDA AQOONSIGA

مذكرة الهوية

DR. SADIID AHMED MAMUUD



Magaca/الاسم/Name

AHMED

ABDIRAHMAN OMAR

21 DEC 2019

COPY

NOOTAYO TAKKULO



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth
10 Oct 1978 GALKAIO

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue
07 Feb 2019 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry
06 Feb 2024

Lab/Dheddig/الجنس/Gender
MALE



RepNo.2720/BRK/2017

Tr.04/01/2018

**UJEEDDO: DHISME SHIRKAD LA MAGAC BAXDAY SHIRKADDA:
AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO.**

Muqdisho, Maanta oo ay taariikhdu tahay 04/01/2018, anigoo ah Nootaayaha Dr SACIID CALI MAXAMUUD ahna Nootaayaha TAAKULO Muqdisho waxaa Xafiiskeyga oo ku yaala Muqdisho Degmada H/wadaag gaar ahaan wadada 2aad ee suuqa bakaraha sarta STN iigu yimid

1. Abdinur Muhyadin Mohamed
2. Ali Gaataxo Yussuf
3. Ahmed Abdiraxmaan Omar

Mudanayaashaas oo magacyadooda kor ku qoran yihiin oo ka kaaftoomay kaalmo marqaati oon aniga Nootaayaha Taakulo ahi aqoonsaday ayaa waxuu iga codsaday inaan qoraal ugu samaeyo hab dhismeedka Shirkadda AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO Soo ah sida soo socota:

Qod:1aad Dhismaha Shirkadda

In ay dhiseen Shirkad la magac AL CADAALA GUM GENERAL TRADING CO oo lagu Aasaasay Moqdisho Somalia, Sanadka 01/01/2010 waxaana aasaasay oo shaqana geliyay Mudanayaashaas aan kor ku soo sheegnay.

Qod 2aad: Mudada Jiritaanka Shirkadda.

Mudada Shirkaddu ay jireyso waa 50 san oo laga bilaabayo maalinta qoraalkaan la qoro laguna qoro buugga Diiwaangalinta Hayadaha sharciga ah, hase yeeshee mudadaas waa la kordhin karaa waana la baabi'in karaa waa haddii loo baahdo. - - -



Qod. 3aad: Hantida Shirkadda.

Hantida shirkadda Lagu aasaasay waa \$USD 97,100 (Sagaashan iyo todobo kun iyo boqol oo doolar) oo u dhiganta 2,000, share oo Xubnaha Shirkaddu isku darsadeen una kala leeyihiin

Magaca	share	Qiimaha shareka	Isku geenta qiimaha lacagta	100%
Abdinur Muhyadin Mohamed	800	\$ 48.55	\$38,840	40%
Ali Gaataxo Yussuf	640	\$ 48.55	\$31,072	32%
Ahmed Abdiraxmaan Omar	560	\$ 48.55	\$27,188	28%

Qod. 4aad: Diiwaanka Hantida Saamilayda.

1. Waxaa ku cad inta uu uu la egyahay qiimaha saami kasta, inta uu saami leeyahay xubin kasta, Magaciisa/Magaceeda, xadidiga uu dhiibay taariikhda la dhiibay iyo dhamaan war bixinadiisa oo tifatiran waxaana kaydinaya Xoghayaha Maamulka Shirkad.
2. Waxaa saxiixayo maamulka shirkada marka la dhameystiro cadaymaha saamiga iyo saamilaha
3. Saamilahah waxaa la siinayaa shahaado cadeyneysa saamigiisa, waxaana saxiixay maamulka shirkada iyo saamilaha.

Qod. 5aad: Luminta Xubinnimada.

- Waa inuu qoraal ku soo codsadaa ka bixidda saamilayda shirkada
- Haddii ay isku raacaan **2/3 xubnaha** aas'aasayaashu wuu ka bixi karaa
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda
- Haddii ay ku cadaato inuu ku takrifalay hantida ama magaca shirkada
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamilayda waa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'iido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka



Qod. 6aad: Gudiga Fulinta

1. Golaha Aas'aasayasha waxay magacabayaan guddi fulineed oo qabta howl maalmeedka shirkadda
2. Gudigu fulinta tiradooda waxa xadidayo golaha aas aas'aasayasha
3. Mudada gudigu shaqeynayo waxaa xadidayo golaha aas aas'aasayasha
4. xubinta gudiga fulinta kuma qaamoobayso shaqsi ahaanteed arin ay wakiil uga tahay shirkadda hadii an la cadayn in ay si cad ugu xadgudubtay masuuliyadii ay shirkadda ku mataleesay

Qod. 7aad: DOORASHADA GUDOOMIYAHA GUDIGA FULINTA IYO KU XIGEENADIISA

1. Aas'aasayasha ayaa dooranayo gudoomiyaha iyo ku xigeenkisa
2. Gudoomiyaha iyo kuxigeenkiisa waxay xilka haynayaan 2 sano oo la cusboonayn karo
3. hadii xilka gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisu banaanado waxaa loo buuxinayaa hab la mid ah habkii loo doortay
4. hadii gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa mar xilka wada baneeyaan waxaa xoghayaha fulinta ku dhawaaqaya fadhi aan caadi ahayn mudo bil gudaheed ah ,xilkoodana isaga sii hayn doona inta shirkadda golaha boodku qabsoomayo



Qod 8aad: Ujeedooyinka Shirakadda

Soo dajinta iyo dhoofinta Xabagta
Soo Dejinjta iyo Keenista products tayo sare leh
Soo Dejinjta iyo Keenista dawada tayo leh, cosmetics iyo food products
keenista cabitaaano tayo wanagsan leh
Keenista caano la soo tijaabiyay tayadooda
Alaabta cosmataciska nuucyadooda kala duwan
Ugu adeegidda macaamiisheed si heer sare ah oo dabooleysa
baahiyahooda
Dhiira gelin iyo soo dhaweeyn sare u sameyen macaamiisheed gudaha
iyo dibada dawada tayo leh, cosmetics iyo food products
Hormarinta Iyo tayenta dawada tayo leh, cosmetics iyo food products ee
soomalia
U fududeynta macamiishada howlaha shirkadda AL CADAALA GUM
GENERAL TRADING CO

Qod: 9 aad Saldhigga Shirkadda

Saldhigga Shirkaddu waa Mogadishu caasimada dalka Somalia, waxayna xarumo ka furan kartaa dhammaan Gobolada dalka Somalia oo idil iyo Dalka dibadiisa

Qod. 10 aad: Guddoonka Shirkadda.

1. Maamulaha Idman ee shirkadda ee ugu horreeya waa **Abdinur Muhyadin Mohamed** oo jagadaas heynaya, wuxuuna awood buuxda u leeyahay Maamulka Guud ee Shirkadda, sida in uu lacag ku shubi karo kana saari karo Bankiyada dalka & Dibadaba, saxiixo jeegaga & seenyooyinka, rahan geliyo hantida shirkada kana saari karo, u soo gadi karo, una sii iibin karo shirkada hantida Maguurtada iyo Guurtada sida, dhulalka, guryaha, Baabuurta, agabyada iwm, lana gelo heshiisyo & macamiil shirkado kale & Hayadaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheynba oo ay dani ugu jirto shirkadda.

Qod: 11 aad Xisaabta Socota e Shirkadda

Xisaabta socota ee Shirkada waxaa la xirayaa sanadkiiba hal mar ayadoo hadba la eegayo baahida jirta oo lana tix galinaayo hadba wixii mudnaanta leh.



Qod: 12 aad Fadhiga Shirkadda

Fadhiga Caadiga ah iyo kan aan caadiga ahayn ee Shirkadda waxaa isugu yeeri kara Guddoomiyaha Shirkadda, ama ku simaha, waana in lagu war galiyaa xubnaha Shirkadda 7 cisho ka hor meesha shirku ka dhacayo, loona sii cayimo oo loo sii sheego.

Qodobka 13 aad:

Hawl-wadeenadda Shirkadda (Board of Directors)

Abdinur Muhyadin Mohamed

Ali Gaataxo Yussuf

Ahmed Abdiraxmaan Omar

Qodobka 14 aad

Wixii aan qoraalkaan ku caddeyn waxaa loo raacayaa sida uu sharcigu qabo ee u dhigan Shirkadaha noocaan oo kale ah iyo qawaaniinta dalka.

Qodobka 15 aad

Qoralkaan oo ku qoran shan bog oo buuxda waxaan u aqriyey dhammaan dadka loo qoray waxayna ii sheegeen inuu ugu qoran yahay sidii ay rabeen wayna wada saxiixeen dhammaantood.

Abdinur Muhyadin Mohamed



Ali Gaataxo Yussuf



Ahmed Abdiraxmaan Omar



NOOTAAYAHA TAAKULO

DR: SACIID CALI MAXAMUUD





Deeq Public Notary

063-4419512

Deeqnotary@gmail.com

Ref: DEPN/13119=/2022

Date: : 18/1/2022

Ujeedo: Wakaalad

Maanta oo ay taariikhdu tahay 18 /1/2022, waxaa xafiiska nootaayada sharciga ah hortiisa ku qabsoontay cadayntan **wakaalad ah.**

Wakiishe

Barkhad Jibriil Xasan.....063-4995073

Aniga oo ah wakiishaha magaciisu kor ku xusan yahay waxaan qoraalkan sharciga hortiisa ku cadaynayaa in anigoo miyir iyo maanba qaba oo xor ah aan u wakiishay **C/laahi Axmed Idle** iyo **C/rashiid Aadan Ducaale** qolada aanu kala iibsanayno Malmalka ee muqdisho oo ay wakaalad buuxda uhaystaan in ay isoo iibiyaan malmalka

C/laahi Axmed Idle.....063-4216336

C/rashiid Aadan Ducaale..063-4202265

Maragyo:

1. **Deeq Jaamac Cabdi.....4781081**
2. **Xamse C/qadir Maxamed.....4196537**

CADEYN TA NOOTAAYADA SHARCIGA

Xafiska nootaayada ayaa lagu hor ansixiyay cadaymahan
Sarkaalka nootaayada sharciga ah ee (Deeq Public Notary)
Garyaqaan: C/kariin Siciid Ismaaciil Cali





FOOMKA WAKAALAD BIXINTA

REP. 054 /2021.

Tr, 07/02/2021,

Magaca qaadaha: →

Axmed C/axmaan Cumar Cali

Meeshuu deganyahay →

Muqdisho

Telfoonkiisa: →

0615592173

SAXIIXA QAADAHA:

Axmed

SAXIIXA BIXIYAHA:

[Signature]